

Taageero dheeraad
ah oo bilaash ah hel
waqtiyada go'ista
korontada.

Isku diiwaangeli
Adeegyada
Mudnaanta leh.



Scottish & Southern
Electricity Networks

Gargaar dheeraad ah oo loogu talagalay dadka baahida ugu badan u qaba

Waxaan annagu nahay dadka daryeela siligyada iyo xarkaha korontada u keena bulshooyinka ku kala baahsan waqooyiga Skotland iyo bartamaha koonfurta England. Annagu ma nihin shirkadda kuu soo dirta biilasha korontada – waxay shaqadayadu tahay in aan dayactirno oo aan dib u hagaajinno shabakadaha korontada dhabtooda. Waxaa weliba shaqadayada ah in aan go'ista korontada u hagaajinno sida ugu dhakhso badan ee ugu nabadaysan ee suurogalka ah.



Waxaan og nahay in go'ista korontadu ay walwal dhalin karto ama adkaan karto, taas awgeed ayaan ugu deeqnaa gargaar iyo taageero dheeraad ah oo bilaash ah. Waxaan si aad uga fiican, oo uga dhakhso badan, kuugu caawin karnaa haddii aan hore u ogaanno taageerada dheeraadka ah ee laga yaabo in aad u baahato. Haddii aad rabto in aad isku diiwaangeliso ama is qorto Adeegyada Mudnaanta leh (Priority Services), xataa haddii ay tahay oo keliya waqtii ku meelgaar ah, fadlan annaga naga soo wac lambarka **0800 294 3259** ama soo buuxi foomka halkan ku lifaaqan.



Waxaa kuu fiicnaan karta in aad ku jirto diiwaankayaga haddii aad:

- Dhego la'dahay ama dhego culus tahay
- Naafo qabto
- La nooshahay carruur shan jir ka yar
- Indho la'dahay ama araggaagu dhiman yahay
- Qabto cudur dabatheeraad ah
- Isticmaasho qalab caafimaadeed/alaab aad isku caawiso oo korontada u baahan
- Ka weyn tahay 60 jir

Dabcan, dadkoo dhani waxay qabaan baahiyoo kaladuwaa markaa si xor ah noola soo xiriir si aan uga wada hadalno baahiyahaaga.

Waxa aan ku tala jirno in aan ku deeqno

Macaamilo mudnaan leh waqtiga go'ista korontada



Khadka Adeegyadayada Mudnaanta leh waxuu diyaar yahay 24 saacadood maalintii. Adiga, ama xiriirkha aad magacaabtay, ayaa idinla soo xiriiri doonaa haddii aan u baahanno in aan korontadaada jarno si aan u qabanno dayactir muhiim ah.

Kula xiriirinta adeegyada gurmadka degdeggaa ah ee xaafadda



Waxaan la shaqaynaa dawladaha hoose, adeegyada gurmadka degdeggaa ah iyo hay'adaha, sida ururka Laanqayrt Cas ee Ingiriiska, si aan taageero dheeraad ah u siinno dadka ku jira Diiwaankayaga Adeegyada Mudnaanta leh.

Bixinta korontada xaaladda degdeggaa ah



Haddii aad isticmaasho qalab caafimaadeed/alaab aad isku caawiso oo korontada u baahan waxaan ku tala jirnaa in aan bixinno matoorro koronto oo la qaadan karo waqtiyada go'ista dheer ee korontada.

Talo badbaado oo ku toosan baahiyahaaga



Marka aad codsato, waxaan kuugu deeqi doonaa talo ku saabsan sida aad iskugu diyaarinayso go'ista korontada oo ku dhigan qaab ama nuskhad ku habboon baahiyahaaga, matalan farta Braille ee dadka indhaha la', telefoon qoraal, cajal dhegeysi ah ama luqad ka duwan Ingiriisiga.

Adeegyo u diyaar ah bulshadaada



Waqtiyada dhacdooyinka cimilada ee daran iyo go'ista dheer ee korontada, xiriirka aan la leenahay baabuurta wanaagga xaafadda ayaa naga caawiya qorshaha aan ugu jirno in aan bixinno cuntooyin, cabbitaanno, diirranaan iyo baro baatari buuxin.

Maskax deggan



Waxaan ku deeqnaa adeeg aad ugu heshiin karto erey isgarad ah oo aad isticmaasho marka aad la macaamilayso shaqaalaha Scottish and Southern Electricity Networks. Waxaan sidaas ku daryeeli karnaa badbaadadaada shakhsii ahaaneed iyo amniga gurigaaga.

Adeegyadayada Mudnaanta leh dhammaan waa BILAASH



Scottish & Southern
Electricity Networks

POWER CUT?
CALL 105



Maanta isku diiwaangeli Adeegyada Mudnaanta leh.

Foomka soo buuxi ama ku soo wac **BILAASH**



0800 294 3259



0800 316 5457 telefoonka
qoraalka

War dheeraad ah ka hel halkan



ssen.co.uk/priorityservices

Isku diyaari mararka korontadu go'do.



Soo dhawayso dhar diirran iyo
toosh baatari ku socda.



Hubi in aad haysato meel kaloo
aad koronto uga hesho wixii qalab
caafimaadeed ah.



Fiiri in kursigaaga jaranjarada lagu
fulo gacanta lagu socodsiin karo ama
uu leeyahay baatari uu isku tiiriyo.



[/ssencommunity](https://www.facebook.com/ssencommunity)



[@ssencommunity](https://twitter.com/ssencommunity)

Scottish and Southern Electricity Networks waa magaca ganacsiga: Scottish and Southern Energy Power Distribution Limited Ka diiwaangashan Skotland Lam. SC213459; Scottish Hydro Electric Transmission plc Ka diiwaangashan Skotland Lam. SC213461; Scottish Hydro Electric Power Distribution plc Ka diiwaangashan Skotland Lam. SC213460; (oo dharmmaan Xafiisydooda Diiwaangelintu ku yaallaan ciwaanka Inveralmond House 200 Dunkeld Road Perth PH1 3AQ); iyo Southern Electric Power Distribution plc Ka diiwaangashan England & Wales Lam. 04094290 oo Xafiiskooda Diiwaangelintu ku yaallo ciwaanka No. 1 Forbury Place 43 Forbury Road Reading RG1 3JH oo iyagu xubin ka ah SSE Group www.ssen.co.uk

006001

Foomka diiwaangelinta Adeegyada Mudnaanta leh

Macluumaadka xiriirka

qofka laga yaabo in uu gargaar dheeraad ah u baahdo waqtiga go'ista korontada.

Horgalahaa

Magaca
koowaad

Magaca
qoyska

Cinwaanka

Booskoodka

Telefoonka
guriga

Telefoonka
gacanta

Telefoonka
qoraalka

Amniga booqashada guriga

(Ugu badnaan 10 xuruuf)

Haddii aad rabto in aan annagu
isticmaalno erey isgarad ah marka aan ku
soo booqanno, fadlan kaas halkan ku qor:

Xiriirka aan magacaabtay (marka habboon)

Qof saaxiib kuu ah ama xubin qoys oo aan kala xiriiri karno
Adeegyada Mudnaanta leh iyo qasaska korontada.

Horgalahaa

Magaca
koowaad

Magaca
qoyska

Telefoonka
guriga

Telefoonka
gacanta

Telefoonka
qoraalka

Waxa aad
isku tiiuin

Si aad u hesho macluumaadka ku saabsan habka aan u gurno, u kaydinno,
ugana shaqayno xogtaada, Ogaysiintayada Sirta ka eeg halkan [ssen.co.uk/
PrivacyNotice/](http://ssen.co.uk/PrivacyNotice) (nala soo xiriir si aad u codsato nuqul warqad ku daabacan).

Haddii aadan iminka ka dib u baahnayn Adeegyada Mudnaanta leh, naga
soo wac lambarka **0800 294 3259** ama nagula soo xiriir telefoonka
qoraalka ee lambarka **0800 316 5457** ama halkan **Networks.Priority.
Services@sse.com**, waxaanad adiga kaa saari doonaa diiwaanka.

Foomka diiwaangelinta Adeegyada Mudnaanta leh

Sababta isku diiwaangelinta (sax ku calaamadee dhammaan sanduuqyada habboon)

Qalabka caafimaadeed/
alaabta la isku caawyo
oo korontada u baahan

Nooca Qalabka

Cudur
dabadheeraad ah

Indha la'

Arag dhiman

Dhibaatooyinka
hadalka

Dhantaalanka
addimada jirka

Ka weyn 60 jir

Cudurka
waallida

Dhaq-dhaqaaq
xaddidan

Xaalad ku xiran
koritaanka ama
horumarka

Dhego culays
ama dhego
la'aan

Qoysaska haysta
carruurta 5 jir ka yar

Caafimaadka maskaxda

Ku meelgaar:

Xubin reer
qaangaar da' yar

Bogsashada ka
dambaysa isbitaalka

Isbeddellada
nolosha

Sababaha kale ee laga yaabo in aad ugu baahan tahay
taageero dheeraad ah (fadlan sheeg)

Haddii af Ingiriisigu uusan ahayn luqaddaada
hooyo, fadlan noo sheeg waxa ay taasi tahay?

Halkeed annaga naga maqashay?

Saxiixidda foomkani waxa ay adiga kaaga dhigan tahay

Marka aad foomkan saxiixdo waxaad xaqijinaysaa in aad fahansan tahay in aan u baahan karno in aan macluumaadkaaga u gudbinno dad kale waqtiga xaalad degdeg ah si aad adiga kuu siin karno Adeegyada Mudnaanta leh; waxaa tan ka mid noqon kara ururka Laanqayrt Cas ee Ingiriiska, dawladaha hoose ama adeegyada gurmadka degdeega ah. Haddii aad leedahay xiriir aad magacaabatay waxaad si cad u oggolaanaysaa in aan adiga kuula hadalno xiriirka aad magacaabatay marka aan bixinayno Adeegyada Mudnaanta leh. Waxay tani keeni kartaa in aan qofkaas la wadaagno macluumaadka adiga kugu saabsan iyo macluumaadka ku saabsan tamarta gurigaaga la keeno.

Magaca xuruuf
waaweyn

Taariikhda

Saxiixa

Wadaagista macluumaadkaaga

Marka aad oggolaato, waxaan macluumaadkaaga u gudbin karnaa shirkadda kuu keenta tamarta guriga iyo sidha gaaskaaga oo laga yaabo in ay sidoo kale ugu deeqaan Adeegyo Mudnaan leh oo aad ka faa'iido heli karto.

Wuxaan oggolaanayaa in macluumaadkayga la wadaago

Fadlan u dir halkan:

Priority Services, Scottish and Southern Electricity Networks, FREEPOST, RTGH-TXXT-ZAEG
Inveralmond House, 200 Dunkeld Road, Perth, PH1 3AQ